

Foomka Ogolaanshaha Kaqeyb Gal ee Waalidiinta

Safarka Buugaagta ee Busload: Foomka Ogolaanshaha Kaqeyb Galka Sahminta ee Ardayga

Cilmi baarista waxaa qaadaya Waaxda Waxbarashada iyo Cilmiga Bulshada

Washington College

Chestertown, Maryland

Ciwaanka Mashruuca: Ogaanshaha Saameynta Safarka Buugaagta ee Busload

Cilmi baarayaasha: Drs. Sara Clarke-De Reza, Bridget Bunten, iyo Nick Garcia, iyo Professors Michelle Johnson, & Erin Counihan

Ujeedada:

Ujeedada cilmi baarista ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo saameynta ay ku leedahay in qoraa/sawir sameye soo booqdo uuna buugaag siiyo ardayda caruurta ee dugsiiga hoose. Qaasatan, waxaan aad u daneyneena sida lakulanka qoraa iyo sawir sameye, iyo helida buug bilaash ah, ay u badali karto sida uu u fikiro ardaygaaga ama uu u arko wax aqriska, qoraalka, iyo hal abuurka.

Habraaca:

Haddii aad u ogoshahay ilmahaaga in uu ka qeyb qaato cilmi baarista, waxaa la weydiin doona in ay sameyaan walxaha soo socda:

- In uu dhameystiro sahmin qarsoon oo hal bog ah kuna saabsan siduu u arko aqoonta iyo waxa uu bandhiga ka aaminsan yahay intuu bilaaban ka hor
- In uu dhameystiro sahmin qarsoon oo hal bog ah kuna saabsan siduu u arko aqoonta iyo waxa uu bandhiga ka aaminsan yahay markuu bandhiga dhamaado kadib
- In uu dhameystiro sahmin qarsoon oo hal bog ah kuna saabsan siduu u arko aqoonta iyo waxa uu bandhiga ka aaminsan yahay hal bil kadib markuu bandhiga dhamaado

Waqtiga guud ee loo baahan yahay in lagu dhameystiro halkii sahmin waxa uu ka yaraan doona 5 daqiiqo. Ilmahaaga waxa uu heystaa fursad uu ku diido in uu ka qeyb qaato sahmintaa. Haddii uu doorto in uusan ka qeyb qaadan, waxa loo diri doona badalkeed howlo uu dhameystiro oon sahmin la xiriirin.

Qataraha/Faa'iidoyinka ka qeyb qaadasho:

Qataraha ka imaan karto ka qeyb qaadashada cilmi baarista aad ayee u yar tahay. Ilmahaaga ayaa ku caajisi karo dhameystirka su'aalaha sahmintaa. Faa'iidoyinka ka qeyb qaadasho ayaa noqon kara in uu helo fursad uu ku milicsado aqoontu ka helay iyo siduu dareemay.

Dabciga Iskaa Wax Uqabsada ah ee Cilmi Baarista:

Sida aan kor kusoo xusnay, ka qeyb qalka ardaygaaga ee cilmi baaristan gabi ahaanba waa mid iskaa ah. Waxa ay wali awoodi karayaan in ay ka qeyb qaataan bandhiga iyo bandhigyada qoraayaasha xitaa haddii aysan ka qeyb qaadan cilmi baarista. Waxa ay iska diidi karaan ama ay iska joojin karaan ka qeyb qaadashada cilmi baarista waqti kasta ama waxa ay ka boodi karaan su'aal kasto aysan rabin in ay ka jawaabaan. Magacooda laguma soo xiriirin karo jawaabta ay bixinayaan ama jawaabaha ay ka bixinayaan su'aalaha. Warbixin suuro gelin karta in la ogaado ardaygaaga, ama qofkale oo ka qeyb qaadanaya laguma soo dari doono warbixin kasta oo soo baxda. Xogta waxa kaliya oo arki karaya ayaa ah shaqaalaha ka shaqeynaya mashruucan.

Su'aallaha iyo Laxiriirida:

Ka hor inta aadan saxiixin foomkan, waxaad ina weydiin kartaa su'aal kasto oo ku saabsan cilmi baaristan, macalinka ilmahaaga, maamulka iskuulka, ama cilmi baarayaasha mashruuca. Hogaanka mashruuca, Dr. Clarke-De Reza, ayaad kala xiriiri kartaa email-ka research@robbiandmatthew.com iosclarkedereza2@washcoll.edu.

Warbixinta Ogolaanshaha:

Waxaan aqriye warbixinta kor ku qoran. Waxaan weyddiiyay su'aallaha aan ka qabay cilmi baarista, waana leyga jawaabay ilaa heer aan ku qanco. Waxaan raali ka ahay in aan u ogolahay ilmaheyga in uu ka qeyb qaato cilmi baaristan.

Magaca ardayga (fadlan daabac): _____

Saxiixa waalidka/Masuulka: _____

Magaca Waalidka/Masuulka (fadlan daabac): _____

Taariikh: _____